

IN LAGAA CAAWIMO BIXINTA BIILASHADAADA

Haddii adiga, ama qof aad taqaan, ka welwelsan yahay biilka tamarta ee soo socda sababtoo ah xaalladaada dhaqaale ayaa isbedeshay COVID-19 darteed, waxaa ku caawimi karta tafaariiqlayda tamarta.

Waan fahamsanahay in laga yaabo inaad u baahan tahay caawima siyaada ah inta lagu jiro waqtigan adag tafaariiqlayda (kuwa bixiya adeega tamarta) ayaana ka shaqaynaya caawimida kuwa u baahan caawima siyaada ah. Adeegbixiyahaaga ayaa kaa caawimi kara sidaad u bixin karto, ilaali qorshaha lacagbixinta, waana inaad u sheegtaa haddii aad baahan tahay caawima siyaada ah.

Waxaa jirta kaalmo la heli karo xataa haddii aadan marna gafin bixinta biilka. Iyada oo hadda dad badani guriga ka shaqaynayaan, tafaariiqlaydu waxay ku siin karaan talo wax ku oolla oo ku saabsan sida hoos loogu dhigo isticmaalka tamartaada biilkaagana loo yareeyo, waxayna ku talin karaan hoos u dhigid iyo kaalmada xukuumada.

Dhib ma ku qabtaa bixinta biilasha? La xiriir kuwa bixiya adeega tamarta si lagu caawimo.

Waan ognahay in dad badani qabaan dhibaato dhaqaale iyo dhibaatooyin shaqo hadda, kuwa bixiya adeegaaga tamarta (gaaska iyo/ama korontada) ayaa diyaar ah inay ku caawimaan.

Haddii aad u baahan tahay kaalmo siyaada ah la xiriir korontada iyo gaaska kuwa bixiya, wada hadal gaar idiin ah. Adeegbixiyahaaga nambarkiisu wuxuu ku yaallaa warqada biilka korontada iyo gaaska dusheeda sarre.

Kaalmaynta macaamiisha

Haddii adiga, ama qofaad taqaanaa, ka welwelsan yahay biilka soo socda ee korontada iyo gaaska, la xiriir qolada adeega ku siisa si ay u fahmaan xaalkaaga ayna kuugu sameeyaan qorshaha kaalmada ee saxda ah.

Tafaariiqlayaasha tamarta waxay bixiyaan caawimooyin kala duwan waxayna kaa caawimi karaan inaad maarayso biilashaada soo socda, iyo inaad biilka ku bixiso muddo la dheereeyey, ama lacag bixintaada gadaal loo dhigo. Si wadajir ah ayaad ula shaqayn kartaan adeegbixiyahaaga si aad u samaysaan qorshe kuu shaqayn kara adiga.

Waxaa jirta caawima la heli karo xataa haddii aadan gafin bixinta biilka.

- Ka soo shaqaynta guriga? Tafaariiqlayda tamarta waxay kaa caawin karaan inaad hoos u dhigto isticmaalka tamarta hoosna u dhigto biilashaada.
- COVID-19 saamayn ma ku samaysay biilashadaa tamarta? Mudada lacag bixintaada waad fidin kartaa si ay kuu caawinto.
- Ma ka welwelsan tahay biilashaada soo socda? Adiga iyo kuwa bixiya tamarta waxaad samayn kartaan qorshe lacag bixineed oo kuu shaqayn kara.
- Ma qaadataa JobSeeker? Waxaad xaq u leedahay lacag dhimista biilashaada tamarta taas oo lacag kuu kaydin karta. La xiriir qolada tamarta ku siisa si aad u xaqiijiso in aanay fursadi ku dhaafin.

Kala hadal tafaariiqlayaha wixii ku saabsan lacag dhimista iyo kaalmada dawlada.

Xukuumadaha Dawlad Goboleedyadu ayaa iyaguna siiya kaalmooyin kala duwan macaamiisha ay samaysay COVID-19, ogowna macluumaad badan oo ku saabsan barnaamijyada kaalmada
www.energycouncil.com.au/coronavirus

FACTSHEET: HELPING YOU STAY ON TRACK

©Australian Energy Council 2020. All rights reserved.
Level 14, 50 Market Street, Melbourne VIC 3000
P +61 3 9205 3100 | E info@energycouncil.com.au | W energycouncil.com.au